

# Naloxone waxay badbaadisa naf. Gacanta ku hayso.

Iska badinta lama filaanka ah ayaa ku dhici karta qof kasta oo cunaaya daawo, hadday tahay mid marar dhif ah dhacda, mid joogto ah, ama markii koobaad ay dhacayso. Marka ay dhacdo, inay kuu diyaarsan tahay Naloxone ayaa kaa badbaadinaysa iska badinta oo badbaadinaysa naf.

**Waa maxay Naloxone?** Naloxone (oo badanaa loogu yeero Narcan™) waa aalad muhiim u ah kahortaga iska badinta maadada opioid. Naloxone ayaa lagu buufin karaa sanko ama la isku duri karaa, waxayna badbaadin kartaa nololsha qofka.

Naloxone ma lahan suuragalnimo la iskaga badin karo. Waxyeelo uma keenayso qof aysan jirkiisa ku jirin opioid.

Uma baahnid in lagu qoro si aad u sidato ama u isticmaasho, tababaro ayaana laga heli karaa dhammaan gobalka Maine si aad xog uga ogaato sida lagu helo iyo sida loo isticmaalo.

**Xagee ayaan ka heli karaa naloxone gudaha Maine?** Waxaa jira qaabab badan oo aad naloxone ugu hesho naftaada, qof ehelkaaga ururkaaga.

**Farmashiyaasha.** Qof kasta oo jooga Maine ayaa heli kara daawada sanko lagu buufiyo asagoo aan u baahan in dhakhtar u qoro asagoo ka codsanaaya farmashiilaha. Naloxone waxaa la iibiyaa \$150 calaa kiishad marka aadan haysan caymis.

**Hel waraaqda dhakhtarka** oo ay la socoto warqada dhakhtarka ee opioid kasta. Haddii adiga ama qof ehelka ah loo qoro opioid, codso waraaqda dhakhtarka ee naloxone si loo raaciyo qarashka caymisku daboolayo.

**Ururada maxaliga ah iyo kuwa gobalka.** Si aad u raadiso ururada qaybiya naloxone, booqo <https://getmainenalexone.org>.


**Xiriiriyahaaga OPTIONS ee Maxaliga ah.** Mashruuca Gobalka Maine ee OPTIONS, degmo kasta waxay leedahay Xiriiriye dadka ku xiri kara khayraadka siina kara naloxone. Kala xiriir **KnowYourOptions.ME**.

## BUUFINTA SANKA EE NALOXONE

4 mg

Xog badan ka ogoow oo hel naloxone kuugu dhow adoo booqanaaya **KnowYourOptions.ME**

**OPTIONS**  
**SAVE LIVES**



Hel xogihii ugu danbeeyay adoo ku xirnaanaaya **OPTIONS:**  
Instagram [@knowyouroptionsme](https://www.instagram.com/knowyouroptionsme) | [Facebook.com/knowyouroptionsme](https://www.facebook.com/knowyouroptionsme)